

## Tallaalka koroonaha ee farmashiyayaasha Bergen

Degmada Bergen waxay farmashiyayaal ku yaalla xaafadaha degmada oo dhan la gashay heshiis dadka ka weyn 16 sano looga tallaalayo fayraska koroonaha.

Dadka gaaray 16 sano ee buuxiyay shuruudda muddada ugu gaaban ee loo baahan yahay in ay u dhexayso cirbadaha, waxay tallaalka koroonaha ka qaadan karaan farmashiyayaasha ku qoran liiska hoose, ayaga oo halkaas ka qaadan kara cirbad walba. Dadku waa in ay qaataan nooca tallaalka ee uu farmashiyuhu markaas hayo. Laakiin farmashiyayaasha waxaa laga codsaday in ay had iyo jeer hayaan tallaalka Pfizer. Haddii aad doonayso nooc tallaalka ah oo gaar ah, la xiriiir farmashiyahaaga liiska hoose ku qoran oo weydii.

Tallaalka koroonaha ee farmashiyuhu waa bilaash.

### Farmashiyayaasha soo socda ayaa bixiya tallaalka covid-19

Farmashiyayaashu wakhtiyo kala duwan ayay furan yihiin, inta qof ee ay maalintiiba tallaali karaanna waa kala duwan tahay. Linkiga hoose riix si aad u hesho warbixinta tallaalka koroonaha iyo sidii aad ballan uga qabsan lahayd farmashiyaha gaarka ah. (Ogow linkiga barta internetka iyo ballan-qabsashaduba in ay af-norwiji ku qoran yihiin). Waxaad sidoo kale ballan qabsan kartaa adiga oo farmashiyaha tegaya. Xusuuso in aad aqoonsi qaadato.

- [Apotek 1 Lagunen](#)
- [Apotek 1 Åsane](#)
- [Boots apotek Arna](#)
- [Boots apotek Fyllingsdalen](#)
- [Boots apotek Laksevåg](#)
- [Boots apotek Loddefjord](#)
- [Boots apotek Sandsli](#)
- [Drotningsvik apotek](#)
- [Sandviken apotek](#)
- [Sjukehusapoteket i Bergen](#)
- [Vitusapotek Bien - Bergen](#)
- [Vitusapotek Nordstjernen - Bergen](#)
- [Vitusapotek Paradis - Bergen](#)